



Kormeeraha Guud, Guerrero Waxa uu Helay Aqoonsi Qaran

Guadalupe Guerrero ayaa Ururka Maamulayaasha iyo Kormeerayaasha Laatiinoda ah (ALAS) u magacaabeen qofka qaadanaya Abaalmarinta Kormeeraha Guud ee Sannadka ee Qaranka.

Kormeeraha Guud, Guerrero, kaas oo bishan u dabbaaldegaya afarsano-guuradiisa Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxa lagu sharfi doonaa Sabtida Washington D.C. Munaasabadda Bulsheed ee Abaalmarinta iyo Cashada Qaranka ee Sanadlaha ah ee 18 aad ALAS dhexdeeda.

Intii lagu gudo jiray wakhtigiisii uu ku sugnaa PPS, Kormeeraha Guud, Guerrero waxa uu ku dhextay milay [Sinnaanta Qowmiyadeed iyo Caddaaladda Bulsheed](#) dhammaan qaybaha degmada, waxana uu kormeeray abuuritaanka [Aragti](#) dhamaystiran iyo Qorshe Istiraatiiyadeed oo lagu fulinayo. Waxa uu waajib kaga dhigay degmada caddaaladda cimilada, waxana uu ilaaliyey miisaanka u dhexeeya badbaadada ardayga iyo waxbarashada inta lagu gudo jiro safmarka COVID-19.

Waxa uu ku hoggaamiyey degmada dugsiyo dhexe oo dhamaystiran, isaga oo saddex dugsi furay mid kalena uu soo socdo 2022-23. Waxa uu kormeeray degmo ka samaysay korodh joogto ah [xaddiyada qallinjibinta](#), kuwaas oo gaadhay 83.7% 2019-20, isaga oo mudnaanta siinaya horumarinta guusha ardayga Afrikaanka Maraykanka ah iyo kuwa ah Maraykanka Dhaladka ah.

Kormeeraha Guud, Guerrero waxa uu noqon doonaa mid kamid ah dadka la sharfayo ee ugu sarreeya ee ku jira 17 ka lagu aqoonsan doono munaasabadda ALAS.

“Waxa aanu ku faraxsanahay inaanu ku aqoonsano 17 kan hoggaamiye ee Laatiinoda ah ee cajiibka ah guulahooda iyo u doodistooda gacan ka geysashada horumarinta waxbarashada iyo fursadaha ay helaan Laatiinoda iyo dhallinyarada kale ee kasoo jeeda bulshooyinka taariikh ahaan la sooco iyo ku hawlanaantooda inay hodmiyaan qaab-aragga dhaqankayaga hodanka ah ee kala duwan ee Laatiinoda,” ayey tidhi Agaasimaha Fulinta ALAS Dr. Maria Armstrong. “Iyagu dhab ahaan waa dhiirrigelin waxana aanu rajaynaynaa in aanu u dabbaaldeegno guulahooda!”